Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب رئيس الوزراء

The Federal Republic of Somalia
Office of the Prime Minister

**Xeer Ra'iisul Wasaare Lr.140** **Tariikh: 12/10/2023**

**XEERKA: SIYAASADDA DHAQANKA EE SOOMAALIYA**

XRW - BIXIT
22 OCT 2023
OPM - EXIT

**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;**

**Markuu arkay:** Qodobka 99[aad] farqadaha (a), (b) iyo (e) ee Dastuurka KMG.

**Markuu arkay:** Qodobka 100[aad] farqadaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG.

**Markuu arkay:** Soojeedinta Wasiirka Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Dalxiiska.

**Markuu arkay:** Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.49.10.23 ee 12/10/2023,** kuna saabsan ansixinta **Siyaasadda Dhaqanka ee Soomaaliya** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

**Markuu tixgeliyey:** Muhiimadda ay leeyahay Siyaasadda Dhaqanka ee Soomaaliya.

**Wuxuu Meel-mariyey:**

**Qodobka 1[aad]**

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.49.10.23** ee **12/10/2023,** kuna saabsan ansixinta **Siyaasadda Dhaqanka ee Soomaaliya** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

**Qodobka 2aad**

Siyaasadda Dhaqanka ee Soomaaliya, waxaa hir-gelintiisa u xilsaaran Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Dalxiiska.

**Qodobka 3aad**

Siyaasadda Dhaqanka ee Soomaaliya waxa uu dhaqan-galayaa marka uu Saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIIWAAN NO : HAN-114-23
TAARIIKH : 11-12-2023
SAXIIX :
AVV. Ahmed Isse Gutale
Hantidhawraha Guud ee Qaranka

XUKUUMADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA FEDERAL GOVERNMENT OF SOMALIA OFFICE OF THE PRIME MINISTER

**Mudane, Hamza Cabdi Barre**
**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS**

**Tariikh: 12/10/2023**

**Xeer Ra'iisul Wasaare Lr.140**

**XEERKA: SIYAASADDA DHAQANKA EE SOOMAALIYA**

XRW - BIXIT
22 OCT 2023
OPM - EXIT

**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;**

**Markuu arkay:** Qodobka 99[aad] farqadaha (a), (b) iyo (e) ee Dastuurka KMG.

**Markuu arkay:** Qodobka 100[aad] farqadaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG.

**Markuu arkay:** Soojeedinta Wasiirka Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Dalxiiska.

**Markuu arkay:** Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.49.10.23 ee 12/10/2023,** kuna saabsan ansixinta **Siyaasadda Dhaqanka ee Soomaaliya** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

**Markuu tixgeliyey:** Muhiimadda ay leeyahay Siyaasadda Dhaqanka ee Soomaaliya.

**Wuxuu Meel-mariyey:**

**Qodobka 1[aad]**

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.49.10.23** ee **12/10/2023,** kuna saabsan ansixinta **Siyaasadda Dhaqanka ee Soomaaliya** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

## Qodobka 2aad

Siyaasadda Dhaqanka ee Soomaaliya, waxaa hir-gelintiisa u xilsaaran Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Dalxiiska.

## Qodobka 3aad

Siyaasadda Dhaqanka ee Soomaaliya waxa uu dhaqan-galayaa marka uu Saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

XUKUUMADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA FEDERAL GOVERNMENT OF SOMALIA OFFICE OF THE PRIME MINISTER

**Mudane, Hamza Cabdi Barre**
**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS**

MINISTRY OF INFORMATION, CULTURE & TOURISM

MoICT-SOMALIA

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

WASAARADDA WARFAAFINTA, DHAQANKA & DALXIISKA

# SIYAASADDA QARAN EE DHAQANKA

Sept - 2023

Muqdisho - Soomaaliya

**JAMHUURIYADDA FEDERAALKA EE SOOMAALIYA**



**WASAARADDA WARFAAFINTA, DHAQANKA IYO DALXIISKA.**

Jidka Villa Somalia, Warta Nabadda District, Mogadishu-Somalia.
Website-ka: http://moi.gov.so/

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
Wasaaradda Warfaafinta Dhaqanka & Dalxiiska



Soo Jeedinta Wasiirka Warfaafinta Dhaqanka & Dalxiiska
Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

# DAA'UUD AWEYS JAAMAC

# WASIIRKA WARFAAFINTA DHAQANKA & DALXIISKA

# TUSMADDA MAWDUUCYADDA

TUSMADDA MAWDUUCYADDA .......... 4
HORDHAC .......... 5
DEJINTA SIYAASADDA QARAN EE DHAQANKA .......... 7
UJEEDOOYINKA SIYAASADA DHAQANKA: .......... 7
YOOLKA SIYAASADDA QARAN EE DHAQANKA 2023 – 2028: .......... 7
HIGSIGA, SIYAASADDA DHAQANKA SOOMAALIYEED .......... 7
MABAADII'DA HAGAYSA SIYAASADDA: .......... 8
HIRGALINTA SIYAASADDA DHAQANKA. .......... 8
GEEDKA IYO GARTA: .......... 8
DHAQANKA IYO HORUMARKA WAARA. .......... 9
WARSHADAHA HAL-ABUURKA DHAQANKA.(CULTURE CREATING INDUSTRIES) .......... 9
DHAQANKA IYO DAWLADNIMADA. .......... 10
GUNAANAD .......... 10

**HORDHAC**

Soomaaliya waxay leedahay dhaqan soo jireen ah oo ka turjumaya heerarka kala duwan ee nolosha dadka Soomaaliyeed. Dhaqanka Soomaaliyeed, wuxuu salka ku hayaa nolosha dadka reer guuraaga ah, beeralayda iyo dadka kuluumaysatada ah. Maadaama inta badan dadka Soomaaliyeed ay ahaayeen kuwa aan wax qorin, ayaa Soomaalidu waxay dhaqan u lahayd inay suugaanta noocyadeeda kala duwan isugu gudbiso fariimaha, iyagoo isku xog waraysan jirey, iskuna maaweelin jirey Gabayada, Geeraarada, Guurowga, Heesaha, Sayliciga, Buraanburka, Jiiftada, Shiribka, Dhaantada, Wilisiqo, Kabeebey, Saarka, Beereey, Jaandheer, Sharax, IWM.

Bulshadda Soomaaliyeed waxay leeyihin dhaqan soojireen ah oo suuban diin iyo hab-dhaqan sugan oo ay ku soo dhaqmayeen kafac kafac, Xoriyadii ay Soomaaliya heshay **1960** ka dib waxaa jiray kooxo ka shaqeeya dhaqanka iyo suugaanta, goobo dhaqan, Kooxo abaabulan oo fanka iyo suugaanta, gabay-yahano iwm.

Sidoo kale waxaa bud-dhig u ah shareecadda islaamka iyo dhaqanka suuban ee Soomaaliyeed. Intaa waxaa dheer, Hay'adda u qaabilsan Qaramadda middoobay Waxbarashadda, sayniska iyo dhaqanka ee **UNESCO (2002)** waxay ku qeexday dhaqanka inuu yahay "xeerka gaarka ah muuqaalada ruuxiga ah, maadiga, garaadka shucuubeed ee bulshada ama koox bulshada ka mid ah, ama ay bulsho ka kooban tahay, sida fanka iyo suugaanta, qaab nololeedka; habka wada noolaanshaha, nidaamka qiimaha dhaqan bulsho, caadooyinka iyo caqiidada." Dhaqanku waa fikradaha, caadooyinka iyo hab-dhaqanka bulshadeed, calaamadaha aqoonsiga bulsho qiyamkooda, luqaddooda, qaab nololeedkooda, caadooyinkooda, fankooda iyo aqoontooda dhaqanka.

Dhaqanka Soomaalidu waa mid soo jireen ahaa kaasi oo jiilal badan iska dhaxleen. Sida taariikhyahanadu sheegeen wuxuu asal ahaan ka sameeysmay nolosha maalinle iyo xiriirka bulshada Soomaalidu la sameeysay bulshooyinka deriska ah iyo xiriirka ganacsi iyo waxbarasho ee deegaanada fogfog.

Soomaalidu waxay lahayd Hu', Hoy iyo Agab dhaqameed u gaara ah. Ragu waxay xiran jireen laba go'oo cadcad oo kala ahaa mid la huwado iyo mid la guntado. Waxaa kaloo ay xiran jireen Kiishad iyo Tooreey, iyagoo gacantana ku qabsan jiray Ul dheer, gaashaan iyo Waran. Waxay la bixi jireen timo waaweyn, iyagoo timaha suran jiray firin, gacantana ku qaadan jiray Barshin. Waxay xiran jireen kabo laga sameeyay hargaha xoolaha.

Dhaqanka dhar xirashada ee dumarkeenu, wuxuu ahaa mid iyaga u gaar ah, waxay xiran jireen Gareys ama Guntiino, oo ay la socdaan kuulo waaweyn oo meelaha qaar looga yaqaano Cunnaabi oo qoorta ay suran jireen. Timaha way tidcan jireen.

Agabka Dhaqanka Soomaaliyeed ee la xusi karo, waxaa ka mid ahaa: Haan, Dhiil, Haruub, Aqal Soomaali, Mudul ama Buul, Dhig iyo lool, Hangool Saab, Kal, Mooye, Barshin, Xeero iyo Fandhaal IWM.

Dhaqanka Soomaalidu waa mid marti-soorka ku wanaagsanaa, oo marka qoyska baadiyaha ay socoto u soo martiyaan, maadaama Soomaalidu reer guuraa ahayd, waxaa lagu soori jiray in xoolo loo qalo, isla markaana cunto dhaqameed loo diyaariyo 'cad iyo caano' iyo noocyada kale ee cuntada Soomaalida sida: Soor ama Shuuro, Canbuulo IWM.

Hogaanka Soomaalida, oo odayaasha dhaqanku ay hormuud ka ahaayeen, waxay geedaha hoostooda ku xalin jireen khilaafaadka bulshada ama qoysaska Soomaaliyeed, iyagoo caan ku ahaa in xal kama dambeys ah oo lagu wada qanco gaari jiray.

Dhaqanka ummadda Soomaaliyeed, waa summad ka gaar yeesha ama ka soocda ummadaha kale ee dunida, waana mid bulshadiisa qiimo weyn ugu fadhiya, oo mideeya. wuxuu kaloo abuurayaa faham caalami ah in bulshadan laga helo, oo dhaqankoodu noqdo mid ka dhex muuqda ummadaha kale.

Taariikh ahaan dhaqanka soomaaliyeed wixii ka danbeeyey burburtay dawladii soomaaliyeed ee dhexe 1991 waxaa meesha ka baxay ilaalinta iyo horumarinta dhaqanka soomaaliyeed, waxaana soo batay kooxo dhaqan-dooris ah oo soo waariday dhaqamo shisheeye.

Burburkii ka dib dawladihii isxigxigay ee dalka soo maray maysan u suuragalin in ay diyaariyaan siyaasad dhaqan oo lagu hago dhaqanka soomaaliyeed.

Hadaba, siyaasaddan waxay hiigsanaysaa in dowladda iyo bulshada Soomaaliyeed ay si wada-jir ah uga hawl-galaan sidii loo soo noolayn lahaa Hiddihii iyo Dhaqankii hore ee Soomaaliyeed, isla markaana loo diyaarin lahaa siyaasad Qaran oo la jaan-qaadi karta siyaasadaha dhaqan ee dunida.
Sidaa darteed, waxay Wasaarada Warfaafinta Dhaqanka iyo Dalxiisku ay halkan ku soo gudbinaysaa siyaasadda Dhaqanka iyo Hiddaha Soomaaliyeed:Qeexida Dhaqanka Soomaaliyeed.

Hadaba, Wasaaradda oo ka duulaysa waajibaadkeeda shaqo ee loo xilsaaray waxay ka shaqaynaysaa horumarinta iyo hagaajinta sharuucda iyo siyaasadda iyo istaraatijiyadda lagu dhaqayo arimaha Dhaqanka oo lafdhabar u ah Ummadda Soomaaliyeed waxayna diyaarisay siyaasadda dhaqanka.

**DEJINTA SIYAASADDA QARAN EE DHAQANKA**

Wasaaradda Warfaafinta Dhaqanka Iyo Dalxiiska JFS oo ka duulaysa Horumarinta Iyo xoojinta Dhaqanka Soomaaliyeed Sida uu qabo dastuurka jamhuuriyadda federaalka Soomaaliya qodobkiisa 31aad ee dastuurka, farqadihiisa 1,2,3 & 4 oo ka hadlaya dhaqanka iyo afka waxa isku hawshay diyaarinta iyo hirgalinta siyaasadda Dhaqanka ee Qaranka mudada udhaxaysa 2023 ilaa 2028.

**UJEEDOOYINKA SIYAASADA DHAQANKA:**

1. Soo noolaynta Dhaqankii Soomaaliyeed.
2. Hirgelinta siyaasadda dhaqanka Soomaaliyeed.
3. Dajinta sharciyadda iyo qorshayaasha lagu hormarinayo dhaqanka Soomaaliyeed.
4. Ku wacyigalinta bulshada muhiimada uu leeyahay dhaqanku.
5. Illaalinta anshaxa dhaqan ee bulshada.
6. Ku ababinta ubadka dhaqanka wanaagsan.
7. Dhiirigelinta, tabo-barida iyo aqoon kordhinta hal-abuurayaasha far-shaxanka iyo fanka.
8. Ciribtirka Dhaqamada gurracan.

**YOOLKA SIYAASADDA QARAN EE DHAQANKA 2023 – 2028:**

Yoolka siyaasaddan waa in dowladda iyo bulshada Soomaaliyeed ay si wada-jir ah uga hawl-galaan sidii loo soo noolayn lahaa Hiddihii iyo Dhaqankii Soomaaliyeed, isla markaana loo diyaarin lahaa siyaasad Qaran oo la jaan-qaadi karta siyaasadaha dhaqan ee dunida.

**HIGSIGA, SIYAASADDA DHAQANKA SOOMAALIYEED.**

Sida hoos ku xusan waa nuxurka la filayo in bulshada Soomaaliyeed iyo kooxaha dhaqanka gaaraan marka la fuliyo Siyaasada Qaranka ee Dhaqanka:

"in la helo siyaasad dhaqan oo ka turjumaysa dhaqanka iyo anshaxa suuban ee Soomaaliyeed waa hiigsiga siyaasadan, sidoo kale waxaa mudnaan xoogan leh soo noolaynta xarumaha dhaqanka ee Dalka iyo tababarida kooxaha dhaqanka si loo helo jiil da'yar oo buuxiya kana qaybqaata soo noolaynta

dhaqanka Soomaaliyeed ee mudooyinkan danbe aan helin horumarin".

**MABAADII'DA HAGAYSA SIYAASADDA:**

Mabaadiida soo socota waxa ay muujinayaan qiyamka asaasiga ah ee ay ka duulayaan ujeedooyinka siyaasada dhaqanka iyo talaabooyinka lama huranka ah. Waxaana waajib ah in lagu dhaqmo, la ilaaliyo oo loo hogaansanaado mabaa'didaasi si looga dhabeeyo hiigsiga Siyaasada Qaranka ee Dhaqanka. Waxayna mabaadi'daasi yihiin:

- Anshaxa suuban (Caqiidada islaamka).
- Madaxbanaanida Soomaliya (dawladnimada).
- Ixtiraamka sharafta, dhaqanka Soomaaliyeed.
- Maamul wanaagga iyo xurmaynta xaquuqda aadanaha.
- Dhiirigalinta iyo awood-siinta kooxaha dhaqanka Soomaaliyeed.
- Iskaashi iyo ka qaybgal balaaran oo ku aadan horumarinta arimaha dhaqanka iyo suugaanta Soomaaliyeed.

**HIRGALINTA SIYAASADDA DHAQANKA.**

- Waxaa la qeexayaa dhaqanka Soomaaliyeed.
- Waxaa la unkayaa summadda Dhaqanka iyo Hiddaha Soomaaliyeed.
- Waxaa la tirokoobayaa lana diiwaangelinayaa xarumaha Dhaqanka ee dalka oo dhan.
- Waxaa la yagleelayaa xarunta dhexe ee Hiddaha iyo Dhaqanka Soomaaliyeed.
- Waxaa dib loo dhisayaa Xarumaha Hidaha iyo Dhaqanka dalka.
- Waxaa dib loo soo celinayaa agabkii Qaran ee Dhaqanka.
- Waxaa bulshada lagu wacyigelinayaa muhiimadda dib u soo nooleynta iyo daryeelka dhaqankooda.
- Waxaa la dhisayaa Guddiga Qaran ee Hidaha iyo Dhaqanka.
- Waxaa Manhajka waxbarashada dalka lagu darayaa barashada Hiddaha iyo Dhaqanka.
- Waxaa dalka oo dhan laga hirgelinayaa carwooyin lagu soo bandhigo Hiddaha iyo Dhaqanka Soomaaliyeed.
- Waxaa la qabanayaa munaasabado lagu soo bandhigo Dhaqanka iyo Hiddaha Soomaaliyeed.
- Waxaa la isku xirayaa hey'adaha dhaqanka ee dalka iyo kuwa caalamka.

**GEEDKA IYO GARTA:**

Geedku waxa uu mar ahaa goob-garsoor(maxkamad) marna waxa uu ahaa gole wadatashi. In garta lagu naqo geed weyn oo hadhac ah hoostiisu, waxa ay ka mid ahayd hab-maamuuska garta gaarka u ah

iyo tiirarka udub-dhexaadka ah ee aan la hilmaami jirin. Si fiican ayaa loo gogli jiray, looguna astaynjiray xeerbeegtida iyo garramayaasha labadaba. Waayo inta badan garta fadhi iyo dooyaysi ayaa lagu naqi jiray, ee taagnida iyo galluubnaantu sax ma ahayn. Sida badanna geedka garta cidna lagama celin jirin oo waxa uu ahaa madal furan oo ay dhagaysigeeda dadku ka qaybgli karaan. Geedka waxa ka garniqi jirray xidaar xeer aqoon ah, oo xirib iyo xilkasnimo lagu majeerto, xurmana ku dhex leh golayaasha lagu galgaal-bixiyo doodaha bulshada ka dhex aloosan.

Anshaxa iyo asluubku waxa uu ahaa in aan hadalka la iska dhabqin, jaarriga iyo jaafaajiriqana laga yareeyo geedka garta. Haddii qof hadal wadana aan laga hororsan ama laga rabshin, oo waxa lagu maahmaahi jiray " hilbo ayaa la wadaagaa hadalse lama wadaago". Kolka ay labada qof ee garramayaa hadlayaan waxa hadalka ka guri jiray nin loo yiqiinnay "wargure". Warguruhu waxa uu adeegsanayaa erayo koobkooban oo muujinaya dhugasho iyo dhegraaricin. Marka ay joogto garta iyo geedka, ragga waxa loo qaybin jiray afar;

1. Nin kasa oo kara
2. Nin kasa oon Karin
3. Nimaan kasin oo kara
4. Nimaan kasin oon Karin.

## DHAQANKA IYO HORUMARKA WAARA.

Horumarka waara waxa loola jeedaa mid daboolaya baahiyaha jiilasha soo koraya ee bulsho Awood buuxdana siinaya jiilalka mustaqbalka si ay u gaadhaan rabitaankooda. Dhaqanku waa qayb ka mid ah horumar waara, kor u qaadida kala duwanaanshiyaha ku qotoma horumar waara oo laga gaaro fahanka dhaqanka bulsho iyada oo loo marayo wada hadal aqoon iswaydaarsi ku qotoma caadooyinka bulshadda Soomaaliyeed. fayo-qabka guud ee bulshooyinka, isku-kalsoonaanta shakhsi ahaaneed iyo tayada nolosha oo lagu xusay muhiimada uu u leeyahay awoodsiinta dadka si ay u yeeshaan lahaanshaha horumarkooda."

## WARSHADAHA HAL-ABUURKA DHAQANKA.(CULTURE CREATING INDUSTRIES)

Dalku wuxuu lahaa goobo soo saara hal abuurka hidaha iyo dhaqanka Soomaaliyeed oo ay ka mid ahaayeen Wakaaladda murtida iyo wacyigalinta Soomaaliyeed oo ay hoos iman jireen Hoboladda

Qaranka ee waaberi iyo goobo kale oo ka shaqeeya arimaha dhaqanka. Wakhtigan la joogo wasaaradda warfaafinta, dhaqanka iyo dalxiiska waxay dadaal ugu jirtaa soo noolaynta xarumaha dhaqanka iyo hal-abuurka Somaaliyeed oo muhiim u ah hal-abuurayaasha Soomaaliyeed waxayna hada dib u howlgalisay Wakaaladda murtida iyo wacyigalinta Soomaaliyeed( Tiyaatarka Qaranka) oo hada uu ka socdo dadaalo lagu soo noolaynayo hal-abuurka iyo dhaqanka Umadda Soomaalida.

**DHAQANKA IYO DAWLADNIMADA.**

Muwaadiniinta Soomaaliyeed waxay Xaq u leeyihiin in ay si xor ah u cabiraan ugana qaybqaadataan dhaqamada suuban ee bulshadda soomaaliyeed iyaga oo aan waxba u dhimayn qiyamka iyo asluubta, anshaxa, si loo dhiirigaliyo horumarinta iyo faafinta dhaqanka soomaaliyeed. Aqoonta, dhaqanka iyo anshaxa suubani waa sifo dimoqraadiya. Xoriyada dhaqanka iyo muujinta dhaqanka suuban ee bulshadda iyo xoojita dhaqan bulsho oo aan ka horimanayn qiyamka iyo sharuucda dalka waa mabaadiida dawlad wanaagga. Dawladimaddu waxay sare u qaadaa wanaagga xorriyadda lagu haysto caqiidada, aqoonta, hadalka, iyo xaqa uu qofku u leeyahay caqiidadiisa.


**GUNAANAD**

Ugu danbeyntii, Siyaasadan waxay sal u tahay dib u soo nooleynta Dhaqanka ummadda Soomaaliyeed, oo uu saameeyay burburkii dalka ka dhacay. Hadaba, fulinta siyaasadan waxay horseedeysaa ilaalinta Dhaqanka Soomaaliyeed. Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Dalxiiska waxay diyaarinaysaa Istaraatijiyad dhaqan oo lagu hirgelinayo siyaasadda dhaqanka ee kor ku xusan.

**==========================DHAMAAD==========================**

SIYAASADDA QARAN EE

# DHAQANKA



Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka & Dalxiiska